اللغة الصومالية

af Soomaali

# Daliilka Muslimka Cusub

## Waa maxay diinta islaamku?

دليل المسلم الجديد، ما هو الإسلام؟

للشيخ د. هيثم سرحان

Syaikh Dr. Haitsam Sarhan

Af-soomaali صومالية

## 3 Qaybaha keliyaynta Alle (Tawxiidka)

Keliyaynta Alle (Tawxiidku), waa in Alle (C.W) loo keliyeeyo waxa oo uu gaarka la yahay, oo ah: rabbinimadiisa, Ilaahnimadisa iyo magacyadiisa iyo tilmaamahiisa wanaagsan

Jaadadka (noocyada) keliyaynta Ilaahayna waa saddex

### U-keliayaynta Rabbinimada

Waana in Ilaahay (C.W) loo keliyeeyo falalkiisa. Ama in Ilaahay(C.W) loo keliyeeyo abuurka,boqortooyada iyo maamulka (koonka).

### U-keliayaynta Ilaahnimada

Waana in Ilaahay (C.W) loo keliyeeyo cibaadada, ama in loo keliyeeyo falalka ay adoomihiisu samaynayaan.

### U-keliyaynta (Ilaahay) magacyadiisa iyo tilmaamihiisa

Waana in Ilaahay (C.W) loo keliyeeyo wixii uu naftiisa ku magacaabay ama ku tilmaamay, kitaabkiisa gudihiisa (Qur'aanka), ama carrabka rasuulkiisa N.N.K.H (Axaadiista).Taana macnaheedu waa; in Ilaahay loo sugo wixii uu naftiisa u sugay, lagana diido wixii uu naftiisa u diiday, iyadoon la leexinayn (macnihiisa) ama aan la macno-siibayn, iyo iyadoon la qaabaynayn ama aan lagu metelayn (uunkiisa).

## Heerarka Diinta ee saddexa ah

### Islaamka

Waana in Ilaahay (C.W) loogu hogaansamo keliyayntiisa, loogu hogaansamo adeeciddiisa, iyo in laga beri noqdo Shirkiga iyo dadkiisa.

**Tiirarka Islaamka 5**

1)Labada Shahaado.
2)Salaadda oo la oogo.
3)Sakada oo lala yimaaddo.
4)Ramadaan oo la soomo.
5)Guriga Alle (Kacbada) oo la soo xajiyo, ruuxii awooda.

### Rumaynta (Iimaanka)

(Iimaankuna) waa; eray carrabka laga dhaho, rumayn qalbiga laga rumeeyo iyo shaqo xubnaha jidhka laga qabto. Wuu kordhaa wuuna is dhimaa.

**Tiirarka Rumaynta (Iimaanka): 6**

1)Rumaynta Ilaahay.
2)(Rumaynta) malaa'igtiisa.
3)(Rumaynta) kutubtiisa.
4)(Rumaynta) rusushiisa.
5)(Rumaynta) Maalinka danbe (Qiyaamaha).
6)Iyo in la rumeeyo qadarka, khayrkiisa iyo sharkiisaba.

### Wanaajinta (Ixsaan)

(Ixsaankuna) waa; in aad Ilaahay (C.W) u caabuddo sidaad aragtid oo kale, haddaadan (Ilaahay) arkayna, isaga ayaa ku arka.

**Ixsaankuna waxa uu leeyahay hal tiir, waxaana hoos tagal abo heer:**

1)(Mushaahadah); waana in aad Alle u caabuddo sida in aad aragto oo kale.
2)(Muraaqabah); haddaanad Alle arkayn, isaga ayaa ku arka.

## 4 Qaybaha xarrimanayaasha (Muxaramaatka)

### Shirki weyn

(Qofka diinta ayuu ka saarayaa, lagamana dhaafayo haddii u uku dhinto). Waxaana lagu qeexaa: in uu Ilaahay u yeelo u dhigme uu baryo sida uu Alle u baryo oo kale, ama uu ka baqo ama quud-darreeyo ama uu jeclaado mid lamid ah jacaylka Ilaahay, ama uu u leexiyo nooc ka mid ah noocyada cibaadada.

### Shirki yar

(Qofka diinta ka saari mayo, waxa uu ka weyn yahay (ka daran yahay) denbiyada waaweyn).Sida in uu qofku dhaho: (haddii Alle iyo adiguba yeeshaan, iyo in lagu dhaarto cid aan Ilaahay ahayn, istuska kiisa yar, qardhaasaha shirkiga ah, shimbiraysiga iyo baasaysiga, in la xidho baraarugta iyo wixii lamida), waa haddii uu qofku aamino in ay sabab u tahay in ay dhibta ka ilaalinayso ama ay isha ka dhawrayso

### denbiyada waaweyn

(Waa wax kasta oo ay ka dhalato ciqaab gaar ah); sida sixirka, waalid inkaarnimada, ribada, Sinada, khaniisnimada, beenta, cabidda khamrada, xatooyada, xanta, qudhgaynta naf uu Ilaahay xarimay wixii aan xaq ahayn, iyo in la cuno hantida agoonka.

### Denbiyada yaryar

(Waxay ka hooseeyaan denbiyada waaweyn). Denbiga weyn waxaa lagu tirtiraa denbidhaaf-dalabka (Istiqfaarta). Denbiyada yaryar waxa ay noqdaan denbi weyn marka lagu adkaysto.Nebigu (N.N.K.H) waxa uu yidhi: "Iska ilaaliya denbiyada la liido; waayo qofka ayay ku kulmaan (aruuraan) ilaa ay ka halaagaan".

# Sifada Waysada iyo gabagabaysiga 2

## Qaabka waysada

Wuxuu niyoonayaa waysasho qalbigiisana waa ka niyoonayaa waxaanuu oranayaa (بسم الله) intaa dabadeed labadiisa kaf ayuu maydhayaa.



1

kadib wuxuu qaadanayaa xantoobo biyaa gacantiisa midig oo waa ku luqluqanayaa qayb ka mida oo biyaha ayuu galinayaa afkiisa waanaa ku wareejinayaa afkiisa, kadib waa soo tufayaa, kadib waa sandaarsanayaa kadib waa iska siiminayaa bimacnaa biyaha ayuu afkiisa ka saarayaa.murfisadiisa bidix ayuu afkiisa marinayaa.



2

kadib wuxuu maydhayaa wajigiisa isagoo ka bilaabaya halkeey timaha madaxu ka bilaabmaan illaa laga gaadhayo lafta gadhka dherer ahaan iyo ballac ahaan inta u dhaxaysa labada dhagood.



3

Em seguida, ele lava as mãos das pontas dos dedos com os cotovelos, começando pela mão direita, depois pela esquerda.



4

kadib wuxuu kadib waxuu maydhayaa gacmahiisa isagoo ka bilaabaya faraha hore ee gacmaha illaa suxula, wuxuu ka bilaabaya gacanta midig kadib ta bidix.



5

Kadib wuxuu galinayaa Murdisadiisa isagoo galinayaa godka dhagta waanaa ku masaxayaa suulkiisa dusha sare ee dhagihiisa.



6

Kadib wuxuu maydhayaa Lugihiisa iyo kuraamihiisa.



7

A regra de aumentar o valor do projeto?

Não é permitido exceder a quantidade prescrita na ablução, como mais de três lavagens, ou lavar o que estiver acima do cotovelo do braço, ou o que estiver acima do calcanhar da perna, ou enxugar o pescoço.



8

Waxa uu Oranayaa markuu dhameeyo waysada

Depois de completar a ablução, ele diz: "Testemunho que não há deus senão Deus, o Único, Ele não tem parceiro, e testemunho que Muhammad é Seu servo e Seu Mensageiro"

9

waxa ka mida waxyaabaha jabiya waysda.

1- wixii kasoo baxa Dabada ama halka hore

2- Caqliga Oo suula sida hurdo ama miirdoorsoom ku taga.

3- Hilibka Geela Oo la Cuno.

10

## Sifada ama qaabka waysada.

Gabagabaysigu waxa uu meeshiisa galay isku daahirinta biyaha hadii uu qofku kariwaayo isticmaalka biyaha xubnaha dahaarada ama qayb ka mida ama waayis Biyo uu waayo ama baqasho uu ka qabo isticmaalka biyaha waxa bartaa galaysa gabagabaysi meeshii biyaha.

1

Uma banaana in uu faraha kala Bixiyo markuu Dhulka Ku dhufanayo Ciidda, ama in uu is dhex galiyo marka uu labada kaf masaxayo

1 2 3 4



2

Waxa uu niyaysanayaa gabagabaysi Qalbigiisa ayuunna ka niyaysanayaa waxaanuu oranayaa (بسم الله). Waxaanuu dhulka ku dhufanayaa hal mar oo kaliya waxaanuu baabacada ku masaxayaa wajigiisa iyo inta sareeysa kafkiisa.



3

## Sifada Maydhashada waajibka ah

Wuxuu niyaysanayaa maydhasho qalbigiisa waxaanuu oranayaa (بسم الله). Si hoose kadib wuxuu ku dhameystirayaa dhamaan jidhkiisa oo dhan iyo meel kaste oo timo yaryari ku yaalaan iyo ka cufanba isagoo luqluqanaya oo sandaarsanaya.

1

- waxyaabaha waajibiya Maydhashada:-

1- Janaabada waxaaneey noqonaysaa soo bixista manida. 2- n uu soo baxo dhiiga xaydku iyo nifaasku. 3- dhimashada uu dhinto qof aan shahiid ahay. 4- islaamka uu islaamo qof gaala.

2

waxa Diyaariyay Dr :- Haysam sarxaan waa bare masjidka nabiga sidoo kale masuulka machad assunnah.
mahadsunnah.com »

Xuquuqda daabacaadu iyo faafintu waa mid fasaxan

Somali
صومالي
01/25

# Qaabka Salaadii Nabiga
## «Sallallaahu Calayhi Wasallam»

1

Waxa Loo sunneeyaa qofka doona in uu tukado in uu ku daba tukado imaamka, hadii uu kali u tukanayana in uu utukado dhanka sutrada.
Sutradda imaamkuna waa sutrada cidda ka danbeysa.

Waxa uu ka yeelayaa aragiisa halka uu sujuuda uu saarayo mana daymoonayo hereeraha.



1

Waxa uu ka yeelayaa labadiisa lugood inta u dhaxeeeysa sida labadiisa garab oo kale kama siyaadinayo kamana nuqsaaminmaayo.



2

Marka uu la yimaado shuruuda salaada kadib wuxuu oranayaa (Allaahu akbar) isagoo gacmaha kor uqaadaya isla markaana isku uruurinaya gacmaha lana simaya dacasha dhagtiisa ama labadiisa garab baabacadana waxa uu ka yeelayaa dhanka qiblada



3

intaa dabadeed wuxuu ka yeelayaa kafkiisa midig baabacadiisa mid ka sareeya kafka baabacadiisa bidix laabtiisa dushiisa.



4

intaa Dabadeed waxa la suneeyaa in uu akhriyo ducada furfurashada salaada rakcada hore oo kaliya, waxa mudan in uu kala badbadalo ducooyinka ku soo arooray furfurashada salaada, oo uu yidhaahdo

ka dib waxa uu iska naaraya shaydaanak sida ku soo aroortay oo ah

adib wuxuu akhrinayaa faatixada isagoo kala dhigdhigaya oo kala habaynaya kalimaadkeeda iyo xuruufteeda iyo xarakaadkeeda

Kadib waxa uu akhrinayaa wixii uga fududaada aayaadka qur,aanka ee kale, waxa sunnaa in aanuu acuudiga akhrin kuna bilaabo uun suuradaha bilowgooda.

5

Kadib wuxuu kor uqaadaya gacmihiisa sidii takbiiratu ixraamba uu kor uqaaday isagoo oranaya, waanaa rukuucaya, waxaanuu qabsanaya jilibkiisa waxaanuu ka yeelayaa dhabarkiisa mid la siman madaxiisa waxaanuu oranaya iyadoo waajib ku ah



6

Kadib markuu kacayo kasoo tooskana ka horeeyabin uu yidhaahdo, isagoo gacmiisa kor uqaadaya lana simaya garabkiisa.

Markuu ka soo toosana wuxuu oranayaa, Waxa Loo sunneeyaa in uu ka siyaadiyo inta soo aroortay.

Kadib waa takbiiranaya isaga on kor uqaadayn gacmihiisa waxaanuu ka sujuudayaa xubnaha todobada ah, wajiga sanka, baabacad kafka, iyo labada jilib, iyo faraha baabacadooda.



7

Waa kala fogaynayaa laba kilkilo iyo caloosha iyo jilbaha iyo sidoo kale jilbka iyo dhudhumada korbaanuu uga qaadaya labadiisa dhudhun dhulka, Iyadoo la waajibinayo waxa usunnaa in uu ka siyaadiyo intavku soo aroortay waxa kaloo la gudboon in uu ku ducaysto wixii uu jeclaado, waxaanaa sii mudan in uu ku ducaysto ducooyinka soo arooray.



8

Kadib waa takbiiranaya waxaanuu ku fadhiisanaya lugtiisa bidix isagoo goglanaya waanaa taagayaa ta midig, wuxuu ka yeelayaa halka hoose ee faraha mid dhanka dhulka u jeeda,farahana wuxuu u jeedinayaa dhanka qiblada,baabacadana wuxuu ka yeelayaa halka udanbeeysa bawyadiisa , Waxaanuu oranayaa in uu ka yeelo lugtiisa bidix



9

Fadhiga noocaasa ayuu ufadhiisanaya sidaa illaa ta sadexaad iyo afraaad mooyee ee ataxyasdka danbe taa wuxuu la imanayaa qaabka tawarruka oo ah mid ka sareeysa dhudhunkiisa midig

Kadib waa takbiiranaya waanaa sujuudayaa sida sujuudii hore kadib waa takbiiranayaa waxaanuu u kacayaa rakcada 2aad waxaanuu sameeynayaa siduu sameeyay rakcadii kaliaya wuxuunbuu ka tagayaa takbiiratu ixraamka iyo ducada furfurashada salaada.

Marka uu ka faaruqo sujuuda labaad wuxuu u fadhiisanayaa attaxyaadka.
Waxaanuu ishaarayaa fartiisa musabixada ee murdisada,waanaa laabayaa ta dhexe iyo faryarada, waa dhaqaajinayaa isagoo baryaya ilaahay.

التحيات لله، والصلوات والطيبات، السلام عليك أيها النبي ورحمة الله وبركاته، السلام علينا وعلى » عباد الله الصالحين، أشهد أن لا إله إلا الله، وأشهد أن محمدًا عبده ورسوله ، اللهم صل على محمد وعلى آل محمد، كما صليت على إبراهيم وعلى آل إبراهيم: إنك حميد مجيد، اللهم بارك على محمد وعلى آل محمد كما باركت على إبراهيم وعلى آل إبراهيم ؛ إنك حميد مجيد.

Kadib ilaahay ayuu ka Magan galayaa afar arin iasagoo oranaya

اللهم إني أعوذ بك من عذاب جهنم ، وأعوذ بك من عذاب القبر ، وأعوذ بك من فتنة الدجال ، »
وأعوذ بك من فتنة المحيا والممات »

Kadib wuxuu alle ku baryayaa wixii uu jeclaado waxaanaa mudan inta soo aroortay in uu alle ku baryo Isagoo oranaya

اللهم أعنّي على ذكرك وشكرك وحسن عبادتك »

Kadib waa salaama naqsanayaa laba salaan naqsi midigtiisa kadib bidixdiisa waxaanuu oranayaa

» السلام عليكم ورحمة الله »



10

Waxa diyaariyay Dr hathim sarhan oo ah bare wax kadhiga masjidka nabiga mushrifna ka ah machad sunne

: mahadsunnah.com »

in la daabaco oo la faafiyaa oo la qaybiyaa waa mid furan.

## XUKUNKA SAKADA AFURKA:

(Sakada afurku) Waajib ayay ku tahay qof kasta oo Muslim ah oo ay qorraxdu u dhacday maalinka u danbeeya ee bisha Ramadaan; ha ahaado qof weyn ama qof yar, lab ama dheddig, addoon ama xor, waa haddii uu helayo hal saac (afar xantoobo muggood qof gacantiisu ay dhexdhexaad tahay) oo ka dheeri ah baahiyaha asaasiga ah iyo wixii ay quudan lahaayeen isaga iyo carruurtiisu maalinka iyo habeenka Ciidda.

Ilmihii uurka hooyadii ku jiray in laga bixiyo sakada afurku, waa sunne ee waajib maaha

**Xikmadda ku jirta jidaynta Sakada Afurka:**

- Waxay daahirin u tahay qofkii soomay bisha Ramadaan, iyadoo ka daahirinaysa xumaantii iyo hadalladii gefka ahaa.
- Waxay fuqarada iyo masaakiinta ka baahi tiraysaa dawarsiga maalinka Ciidda.

**Xilliga la bixinayo Sakada Afurka:**

**Xilli ay banaan tahay:** waa in la bixiyo ciidda ka hor maalin ama labo maalmood.

**Xilli ay sunne tahay:** waa in la bixiyo aroorta maalinka ciidda, salaadda ciidda ka hor.

**Xilli aanay banaanayn:** waa in la bixiyo salaadda ciidda ka dib.

**Wax yaabaha guda Sakada Afurka:**

Sakada Afurka waxaa guda (1 saac) oo cuntada ay dadku quutaan ah. Beegga halka saac ee burka wanaagsanina waa 2.40g, cunto kastana inta uu miisaakeedu noqdaa loo eegayaa.

Sakadan Afurka, lacag ahaan looma bixin karo.

**Beegga Sakada Afurka ee waxyaabaha la quuto kuwooda u caansan:**

| | | |
|---|---|---|
| Bur: 1400g | Qamandi: 2040g | Faasuuliyad: 2060g |
| Maanshaalli: 2000g | Cadas: 2100g | Timir: 1800g |
| Bariis: 2300g | Shunbaro: 2000g | Sabiib: 1640g |

**Qaybaha Sakada marka loo eego qofka qaadanaya iyo qadarka la bixinayo:**

[1] Qayb la tixgeliyo qadarka waxa la bixinayo, iyadoon loo eegin cidda bixinaysa iyo cidda la siinayo; sida Sakada Afurka.

[2] Qayb la tixgeliyo waxa la bixinayo iyo cidda la siinayo, sida fidyada loo yaqaano (Fidyatul-adaa) "*Quudi lix miskiin, miskiin kasta saac badhkii*".

[3] Wax loo tixgeliyo qofka la siinayo ee aan la fiirin waxa la bixinayo; sida kafaarada dhaarta.

# KHALIIFKII AL-MA'MUUN IYO YAHUUDIGII

Khaliifkii Al-Ma'muun waxa uu lahaa gole lagu doodo, waxaa dadkii golaha la soo  galay nin Yuhuudi ah, oo si fiican u lebbisan, weji wanaagsanna leh, wuuna hadlay oo si fiicanna u hadlay. Golihii marki uu dhammaaday, Al-Ma'muun baa u yeedhay oo ku yidhi: ma Israa'iili baad tahay? (Ma Yuhuudi baad tahay?) Wuxuu yidhi: Haa.

Wuxuu ku yidhi:- u hogaansan Islaamka, si aan kuu hagaajiyo. Al-Ma'muun, waxa uu u ballan qaaday wanaag, haddii uu soo islaamo

Yahuudigii waxa uu yidhi: Maya, waxaan ku suganahay diintayda iyo diintii aabbayaashay. Dabadeed wuu baxay. Sanad ka bacdi, ayaa Yahuudigii soo galay isagoo Muslim ah oo ka hadlaya fiqhi iyo xadiis, si fiican buu u hadlay, kolkii shirkii la xidhay ayaa Al-Ma'muun u yeedhay oo ku yidhi: miyaadan ahayn saaxiibkeeni shalay? Wuxuu yidhi: Haa.

Wuxuu yidhi: waa maxay sababta aad u soo islaamtay? Yahuudigii waxa uu yidhi: maalintaas shirkaagii waan ka baxay, waxaanan doonayay inaan diimahan imtixaano oo aan baadho, waxqoristana waan ku fiicanahay, markaasaan aaday kitaabka "Injiil" waxaanan qoray saddex nuqul oo aan wax ku daray waxna ka jaraym kadibna waxaan keenay Kaniisadda, sidaas darteed way iga  iibsadeen iskumayna dhibin inay akhriyaan ama ay dib u eegaan.

Kadibna waxaan aaday "Tawraad" waxaanan ka qoray saddex nuqul oo aan wax ku daray waxna ka jaray, waxaanan geeyay meelaha cibaadada ee yuhuuda, markaasaan ka iibsaday, mayna akhriyin. ama dib u eegis kumayna samaynin, ka dib waxaan u tagay "Qur'aanka" oo aan ka qoray saddex nuqul oo aan wax ku dhax daray waraaqihiisa, waxayna igu yidhaahdeen: aqbali mayno ilaa aan akhrino oo aan dib u eegno. Markaas bay khaladkii ogaadeen, (wixii aan ku daray iyo aan ka gooyay). Wayna gubeen, waxayna ku sigteen inay i dilaan, halkaa  waxaan gartay inuu kitaabkani yahay kitaab Eebbe xafiday, sidaa darteed waa sababta aan u islaamay.

# Sakadu waa labo qaybood

**Sunne:**
waana maal kasta oo uu qofku bixiyo, iyada oo ay ka tahay cibaado barax la'.

**Faral:**

**Waana labo nooc**

## Sakada Jidhka:

Waana sakada Afurka, waxayna waajib ku tahay qof kasta oo Muslim ah: yar iyo weyn, lab iyo dheddig, addoon iyo xorba.

## Sakada maalka:

Sharci ahaan waxaa lagu qeexaa: in Alle lagu caabudo saaridda (bixinta) qayb sharci ahaan ku waajibtay hanti gaar ah, iyadoo la siinayo cid gaar ah. Waana tiirka 3aad ee tiirarka Islaamka

waxayna u qaybsantaa afar qaybood:

### 1 Labada lacagood



dahabka iyo qalinka, iyo wixii booskooda geli kara oo lacag iyo qayrkeedba ah.
Nisaabka dahabka ay sakadu ka waajibto waa 20 misqaal (85g). siaabka qalinkuna waa: 200 dirham (595g).

### 2 Xoolaha foofa



waana xoolaha daaqa wax xalaal ah sannadka badankiisa ama dhammantii, waxaana loola jeedaa nimcoolayda: geela, lo'da iyo ariga.

### 3 Wixii dhulka ka soo baxa



oo iniinyo iyo miro ah.

### 4 Waxyaabaha laga ganacsado



waana wax kasta oo loo diyaariyay iibin ama iibsasho.

# Dadka Sakada iska leh:

**1 Fuqarada**
waa baahi-qabayaasha aan helayn waxba, ama helaya wax aanan ku filnayn.

**2 Masaakiinta**
waana kuwa helaya wax ku filan ama badhkii. Hadaan ka soo qaadno baahida hal sano tusaale ahaa (12,000) faqiirku waa ka heli kara (lix kun) ama waxba. Miskiinkuna waa ka heli kara lix kun ama ka badan laakiin aan gaarsanayn (12,000), waayo miskiinka iyo faqiirka waxaan siinaynaa wax ku filan hal sano, maadaama ay sakadu sanadkii ay hal mar waajibto

**3 Kuwa sakada ka shaqeeya**
aruuriyeyaasha, dhawrayaasha iyo qaybiyeyaasha sakada. Madaxa Muslimiinta ayaana u dhiibaya hawsha, loomana shardiyo inay fuqaro yihiin, waana la siinayaa hantiileyaalba ha ahaadaane.

**4 Kuwa qalbiyadooda la soo dhawaysanayo**
waana kuwa laga rajo qabo inay islaamaan, ama sharkooda la iska qabto, ama iimaankooda la xoojiyo.

**5 Furashada qooraha (Xorayn)**
waana:
1.Mukaatabka Muslimka ah.
2.Xoraynta addoonka Muslimka ah.
3.Soo daynta qafaalanaha Muslimka ah.

**6 Dayn-qabayaasha**
waana:
1.Dayn-qabe u daymoobay heshiisiinta dadka.
2.Qof naf ahaantiisa u daymaysan.

**7 Jidka Alle**
wuxuuna kulansanayaa kuwa duula iyo waxa ay u baahan yihiin oo hub iyo waxa la midka ah.

**8 Musaafirka (Taraagaha)**
waana ruuxa safarka ku jira ee ay sahaydii ka go'day, waxaana sakada laga siinayaa wax gaarsiin kara Meesha uu u socdo.

Af-soomaali صومالية

# Soonku waa labo qaybood:

**Waajib:** soonka Ramadaan, soonka kafaaro-gudka iyo soonka nadarka.

**Sunne:** Wixii intaa ka soo haray,

**Qeexitaanka soonka:** Waa in Ilaahay (C.W.J) lagu caabudo ka-af-qabsiga: cuntada, cabbitaanka iyo dhammaan waxyaabaha wax afuriya, laga bilaabo dillaaca waaga runta ah ilaa ay qorraxdu ka dhacayso.

## Soonku labo tiir ayuu leeyahay:

### 1 Niyaysi

| Niyada faralka | Niyada soonka sunnaha ah |
|---|---|
| Waxaanan laga maarmayn in niyada soonka faralka ah la gunto (la niyoodo) habeenkii -waaga ka hor- guntidda niyada soonkana waxaa ku filan niyaysiga in bisha Ramadaan ay soo gashay. In niyada lagu dhawaaqana waa bidco. | Waxay ansaxaysaa saacad kasta oo maalinka ka mid ah, haddii aanu la iman waxyaabaha wax afuriya, laakin haddii uu niyada gunto ajar ayuu ka helayaa. |

### 2 ka-af-qabsiga waxaabaha wax afuriya.



### Waxyaabaha soonka buriya:

1.cunitaanka iyo cabitaanka hab kas ah, qofkii hilmaan ku cuna ama ku cabana soonkiisu waa sax.
2.Jimaaca (Galmada), haddii uu dhaco maalinka Ramadaan soonkuna uu waajib ku yahay qofka, waxaa ku waajibaysa kafaaro culus. 3.Manida oo qofku iska keeno. 4.Wixii la micne ah cuntada iyo cabitaanka, sida irbadaha nafaqada. 5.In dhiig la isaga keeno toobid. 6.In kas la isooga matajiyo.
7.Imaanshaha dhiigga caadad iyo dhalmada.

### Wax ka mid ah waxyaabaha loo baneeyay soomanaha

- Dhadhaminta cuntada hadii ay baahidu keento.
- Liqidda candhuufta.
- Qabaysiga.
- Cadayga.
- Iscadrinta.
- Isqaboojinta.

## Shuruudda uu soonku ku waajibo

1. Islaamnimo.
2. Garaad (Caqli)
3. Qaan-gaarid, qofka aan qaangaarinna waxaa la jeclaysiinayaa (lagu boorrinayaa) soonka, waxaana faraya masuulkiisa (waalidkii).
4.Negaansho: soonku ku waajibi mayo qofka taraagga ah, waxaana haboon in uu soomo haddii aanu soonku culays ku ahayn, waayo waa sidii uu rasuulku ﷺ samayn jiray, sidoo kale waxaa ku sugan bari-yeeliida dimada qofka waajibku fuulay, waxaa kale oo ku sugan garawshaha badliga bisha Ramadaan.
5. Caafimaad-qab.
6. La'aanta dhiigagga caadada iyo dhalmada.

### Waxyaabaha soonka loo kahdo:

1.In lagu talax-tago luq-luqashada iyo sandaarsiga.
2.Dhadhaminta cuntada baahi la'aan

### Waxyaabha ka xaaraanta ah qofka sooman:

1. Liqidda xaakada, noonkana jebin mayso.
2. Dhunkashada, qofka aan looga aamin ahayn in uu soonku ka fasahaado. 3. Hadalka beenta ah (waana fal xaaraan ah).
4. Af-xumada. 5. Xariirinta soonka (waa inaanu soomin labo maalmood oo is xiga).




- **Tiirarka Xajka:** qofkii ka taga tiir ka mid ah tiirarka xajka, xajkiisu ma dhamaystirmayo la'aantii.
- **Waajibaadka Xajka:** qofkii ka taga waajib ka mid ah waajibaadka xajka, waxa uu ku kabayaa dhiig (Hadyi in uu gawraco).

alsarhaan.com
sarhaan.com

# Manaasikta Cumrada

Af-soomaali صومالية




## Waxyaabaha xidhashada (Cumrada) ku xaaraantimooba:

1. In timaha laga jaro madaxa ama jidhka.
2. In ciddiyaha la iska guro.
3. Adeegsiga cadarka.
4. guursashada (meherinta) naftiisa ama cid kale.
5. La kulanka dumarka.
6. In la dilo ugaadha banka.

**Qayb ka xaaraan ah ragga oo keliya:**

1. Sida dharka, ama xidhashada dharka tolan; waana dharka tolmadiisu ku cabiran tahay xubin ka mid ah xubnaha jidhka.
2. In madaxa lagu daboolo wax ku dhegan (taabanaya).

**Qayb ka xaaraan ah dumarka oo keliya:**

1. In wajiga lagu dedo niqaab ama burquc, laakiin haddii ay la joogto rag ajaanib ka ah, wajigeeda waxa ay ku dedaysaa shalamadda (xijaabka) ay wadato iyo wixii lamida.
2. Xidhashada gacmo-gashiga (galoofyada)

## Sunneyaasha Cumrada:

1. In ciddiyaha la iska guro, iyo inuu daayo timaha ay ku waajibka tahay inuu daysto ka hor intaanu niyoonin xidhashada (cumrada).
2. In loo qabaysto xidhashada cumrada
3. In jidhka la cadariyo (ugaara ragga)
4. Xidhashada hoosgunti iyo qayd (ugaara ragga).
5. Talbiyada: “labbaykallaahumma labbayk. Labbayka laa shariika laka labbayk. Innal-xamda, wannicmata laka mal-mulku. Laa shariika laka”. Waxa uu akhrinayaa laga bilaabo xidhashada cumrada ilaa laga gaadho dawaafka.
6. Jeeni-qaarsiga xilliga dawaafka, ugaara ragga (waa inuu faydo “qaawiyo” garabkiisa midig).
7. Dhunkashada dhagaxa madow.
8. Guclaynta saddexda wareeg ee hore.
9. In labo rakcadood lagu tukado gadaasha “maqaamu Ibraahiim”.

هيثم بن محمد سرحان

و لا تقف ما ليس لك به علم
Ha dul istaagin oo haka hadlin waxaanaad cilmi ulahayn.

و اغضض من صوتك.
Codkaaga hoos udhig

ادفع بالتي هي أحسن.
Isku difaac midba kay ka wanaagsantahay.

و لا تنابزوا بالألقاب.
Ha iskugu yeedhina naaneeysaha xun xun.

إجتنبوا كثيرا من الظن
Ka dheerada in badan oo malaha ka mida.

و أطعموا البائس الفقير
Quudiya ka basaaseeysan ee baahan.

و قولوا قولا سديدا
Dhaha hadal toosan

واحفظوا أيمانكم
ilaaliya dhaarihiinna.

كونوا قوامين بالقسط
Noqda kuwo cadaaladda ku taagan

ولا تلبسوا الحق بالباطل
Ha Hu,winina Xaqqa Baadilka.

و اخفض جناحك للمؤمنين.
U dul dhig dhinacaaga dadka mu,miniinta ah

خذ العفو و أمر بالعرف.
Qaado cafwiga dadkana far wanaaga.

و لا تأكلوا أموالكم بينكم بالباطل
Xoolihiina dhexdeeda haku kala cunina si baadila.

و لا تجسسوا.
Ha is jaasuusina.

و بالوالدين إحسانا و ذي القربى و اليتامى
Labada waalidna u ixsaan sameeya iyo jaarka dhawo iyo agoonka.

أنفقوا مما رزقناكم
Wax ka bixiya waxa aanu idinku arsaaqno.

و تعاونوا على البر و التقوى
isu kaalmeeysta wanaaga alle kacabsiga.

و زنوا بالقسطاس المستقيم
Ku miisaama miisaanka cadaaladda.

اعدلوا
Cadaalad sameeya.

و لا تعثوا في الأرض مفسدين.
Haku xadgudbina dhulka dushiisa idinkoo fasahaadinaya.

و لا تصعر خدك للناس
Haka jeedin dadka wajigaaga adigoo is kibrinaya.

و اعرض عن الجاهلين.
Ka jeedso dadka jaahiliinta ah.

لا تبطلوا صدقاتكم بالمن و الأذى
Haku burin sadaqadaada manno sheegad iyo dhibaateeyn

و لا يغتب بعضكم بعضا
Badhba badhka kale yuu xanan.

و إذا حييتم بتحية فحيوا بأحسن منها
Hadiii isa salaamaysaan salaan isku salaama mid kasii wanaagsan ta lagugu salaamay.

و آتوا اليتامى أموالهم
Siiya agoonta xoolahooda

و لا تعاونوا على الإثم و العدوان
Ha isku kaalmeeysanina danbiga iyo xadgudubta.

و أوفوا الكيل إذا كلتم
Oofiya halbeega markaad miisaysaan.

ولا تعتدوا.
Ha xadgudbina.

و لا تمش في الأرض مرحا
Dhulka dushiisa ha soconin adigoo is kibrinaya.

و اقصد في مشيك.
isdul dhig ka yeel socodkaaga.

ادع إلى سبيل ربك بالحكمة
Ugu yeedh dadka jidka rabbigaa si xikmadi ku jirto.

لا يسخر قوم من قوم
Qoom yay qoom kale xaqirin

ادخلوا في السلم كافة
Islaamnimada si aad u dhantiin gala.

و لا تتبدلوا الخبيث بالطيب
Haku badalin wanaaga xumaan.

و قولوا للناس حسنا
Dhaha dadka hadal wanaagsan.

و أوفوا بعهد الله إذا عاهدتم
Oofiya cahdiga ilaahay marka uu idinla ballamo.




# Waa Kuma Nabi Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

Waxa Tacliiqa Saarey Sh Dr:- Haytham sarxan

Bare Ka Dhigi jiray Masjidka Nabiga,Haddana Maamula Machadka Assunnah.

sarhaan.com

## Waa Kuma Nabi  Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

- Waa Ka Difaacay Xuquuqda Basharka Oo dhan Mudo Laga Joogo 140 Oo Sano.

- Wuxuu Xifdiyey Ragga iyo Dumarka yaryarka iyo dhamaan Dadka Taagta Daran.

- Wuxuu ilaaliyay Xuquuqda Xayawaanka dhirta wuxuu kaloo booriyay in ahmiyad badan la siiyo dhulka.

- Wuxuu ina Amray Akhlaaq wanaaga iyo in aynu Nidaaminno xidhiidh-ka ka dhexeeya aqaaribta iyo jaarka.

- Wuxuu seeska udhisay wada noolaanshaha muslimiinta dhexdooda iyo dadka aan muslimiin ahayn.

- Wuxuu Nidaamiyay Xidhiidhka usrada ama qoyska Taasoo koobsanaysa Xuquuqda wayn ee aabaha iyo hooyadu ku leedahay ubadkooda.

## Waa Kuma Nabi Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

- Wuxuu Diiday Dulmiga waxaanuu ku Baaqay Cadaaladda iyo in la is jeclaado oo la is garabsado oo la is caawiyo.

- Wuxuu Ku Baaqay in la caawiyo ka Baahan sidoo kale in la booqdo ka Xanuusanaya iyo in la is jeclaado iyo in Loo nasteexeeyo mid kaste oo muslim ah.

- Wuxuu Muslimiinta u diiday dhamaan mucaamalaadka Xun xun sida Tuugada qishka iyo in xaq darro la isku dilo iyo dulmiga.

- Nabigu waa Ka Badalay Nolosheena iyo dabcigeena Xun xun una Badalay mid fiican.

- Wuxuu Baray muslimka in aanuu wax Xadin.

- Wuxuu Baray muslim in aanuu Been Sheegin.

- Wuxuu baray muslimka in aanuu khamri cabin.

## Waa Kuma Nabi Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

- Wuxuu Baray Muslimka in aanuu Sinaysan.

- Wuxuu Baray muslimka in aanuu wax qishin.

- Wuxuu Baray Muslimka in aanuu dilin Gaalada heshiiska Kula Jirta Muslimiinta.

- Wuxuu baray muslimka in aanu8 dhibin jaarkiisa muslim ha noqdo ama gaal.

- Wuxuu amray qofka muslimka ah in uu u samo falo labadiisa waalid oo uu shaqeeyo haba ahaado waalidkii mid ay kala diin yihiinee.

- Wuxuu baray qofka Muslimka in uu udhibirsanaado ka Yar iyo dumarka iyo kuwa taagta daran iyo dadka waawayn intaba.

- Waxa uu baray qofka muslimka ah in aanuu cadaabin cid basharka ka mid ah iyo xayawaanaadka sidoo kale inaanuu fasahaadin Dhulka uu dagan yahay.

## Waa Kuma Nabi Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

- Wuxuu baray qofka muslimka ah in uu u naxariisto oo uu jeclaado haweenadiisa oo uu ihtimaam siiyo oo u dhibirsanaado ubadkiisa illaa maalinka u danbeeysa Cumrigiisa.

- Wuxuu baray qofka Muslimka ah in aaneey dhamaan xidhiidhka uu la leeyahay ubadkiisa .

- Muslim kaste waa jecelyahay nabi muxamed ﷺ in ka badan inta uu jecelyahay dadka Kale.

- Wuxuu u bushaareeyay nabi muuse iyo nabi ciise.

- Muslim kaste waa jecelyahay nabi muuse iyo nabi ciise Labadaba waxaanuu Rumaysan yahay in u fadli badanyihiin nabiyada oo dhan.

- Waxa Loosoo diray Nabi Muhammad ﷺ Carab iyo.

## Waa Kuma Nabi  Muhammad ﷺ, Muxuu Se ina Baray?

- Wax Farqiya Ma Kala Leh dadkiisu diintiisa dhexdeeda carabi iyo cajami toona Alle Ka Cabsiga Mooyee.

- Waa  Muhammad ﷺ. Oo rasuulkii ilaahay ah.

- Maad garanaysaa maxay muslim kaste u jecel yihiin nabi muxamed ﷺ?

- Ma ogtahay wuxuu Muhammed ﷺ uga jeedo muslimiinta ?

Wixii intaa dheer ee ku saabsan barashada nabigeena Muhammad ﷺ...

Mawqica Sheekha

sarhaan.com

Machad Al Sunnah.

mahadsunnah.com